Somali

REAL LEARNING FOR REAL LIFE

Su’aalaha Badanaa la Iswaydiiyo: Heerarka Waxbarasho

Waa maxay heerarka barasho?
Heerarka Gobolka Common Core ee Farshaxanada Luuqadda Ingiriiska (ELA) iyo Xisaabtu waa Heerarka Barashada K-12 ee Gobolka Washington. Heerarka barashadu waa sharraxaado kooban, oo si cad loogu sheegay waxa ardaydu ay tahay inay ogaadaan ayna awoodaan inay sameeyaan marxalad gaar ah safarkooda waxbarasho (tus., dhammaadka heer fasal kasta). Common Core ee Gobolka ee ELA iyo xisaabtu waxa si toos ah loo hirgaliyey Luulyo 2011.

Miyey Heerarka Gobolka Common Core ka fiican yihiin heerarkii tacliineed ee hore ee Washington?
Haa, heerarka Common Core aad ayey uga adag yihiin heerarka wabarasho ee hore ee Washington maadooyinkaan. Waxay shiishka saarayaan isu diyaarinta muhiimka ah ee shaqada iyo kuuliyadda iyo xirfadaha ay kamid yihiin xirfadaha fekeris dhab ah iyo dhib-xallin aad ah. Heerarka waxa loogu talogalay inay ku dhisnaadaan fekerka ugu horreeya ee wakhtigan marka la eego u diyaarinta dhammaan ardayda inay ku guulaystaan kuuliyadda iyo shaqada. Heerarku waxay la jaanqaadayaan heerarka ugu fiican ee Maraykanka iyo caalamka.

Side heerarkii xisaabta Washington ee hore loo barbardhigi karaa heerarka Common Core?
Marka la eego daraasadda Thomas B. Fordham, istaandarradayadii xisaabta gobolka ee hore waxay ahaayeen qaar cad oo adag, si la mid ah istaandarrada Common Core Thomas B. Fordham. Hase yeeshee, heerarka Common Core aad ayey uga ballaadhan yihiin sababtoo ah waxay ka caawiyaan ardayda inay isku xidhaan barashadooda gudaha iyo fasallada oo dhan, sidaa darteed mawduuc kasta waxa kujira kuna dhisan yahay kuwii ka horreeyey.

Isbeddelada Waawayn ee Xisaabta:

- **Shiish Saar Wayn:** Common Core wuxuu hoos u galayaa aragtiyaha muhiimka ah, sida jajabyada iyo saamiyada, si loo xaqiijiyo ardaydu inay abuurtaan aasaas/rukun xooggan kahor intayna u gudbin heerka xiga ee adkaanshaha. Shiish saarka aadka ahi wuxuu u oggolaanayaa ardaydu inay ku dabbakhaan masalooyinka xisaabeed ee dhabta ah dugsiga sare iyo wixii ka dambeeya.
- **Is-haysiga/isku xidhnaanta:** Common Core wuxuu waydiiyaa ardayda inay dib ugu xidhmaan wixii ay hore u soo barteen si ay dib ugu xoojiyaan aragtiyaha.
- **Adkaansho:** Common Core wuxuu u baahan yahay isku dheellitir ku fiicnaanshaha aragtida, habka xirfdaha iyo heer sare ku ahaansho, iyo ku isticmaalka xaqiiqaha jira. Inkasta oo xifdi loo baahan yahay, ardayda sidoo kale waxa la waydiin inay ku shaqeeyaan xifdi wax ka baxsan oo ayna gudbiyaan fekerka ka dambeeya jawaabaha.

Side heerarka farshaxanada luuqadda Ingiriiska Washington ee hore loo barbardhigi karaa heerarka Common Core?
Daraasadda Fordham waxa lagu ogaaday in heerarkeena gobolka farshaxanada luuqadda Ingiriiska ee hore ay ka daciifsan yihiin heerarka Common Core. Heerarka farshaxanada luuqadda Ingiriiska Common Core (kaasi oo ay kujiraan akhriska, qorista, iyo xidhiidhka) waxay ku horumarin barashada ardayda filashooyin sare oo waafaqsan shuruudaha galista kuuliyadda. Sidoo kale waxay dheellitirayaan waxa ardaydu ku baranayaan maaddooyinka kale sida cilmiga bulshada iyo sayniska.

Heerarkani waxay siiyaan ardayda fursado badan si ay u dhisaan aqoon iyaga oo isticmaalaya manhaj ku qani ah khayaali, aan khayaali ahan, iyo qoraal wax-sheeg (sida qoraalada cilmiyeed ama dokumentiyada taariikheed). Ardaydu waxay u isticmaali doonaan xaqiiqooyinka iyo caddaymaha qoraalka inay noqdaan aasaaska akhriska iyo qoristooda, waxayna baran sida loo fahmo qoraalo kakan iyo eray-bixnaha tacliineed.

READYWA.org

La cusboonaysiiyey
Maarso 2015

Isbeddelada Waawayn ee Farshaxanada Luuqadda Ingiriiska:

- **Ku darista qoraal wax-sheeg:** Ardaydu wali waxay akhri qaraamiga khayaalka iyo suugaanta, sidoo kalena waxa la waydiin inay akhriyaan oo fahmaan qoraalka wax-sheeg ee aan khayaalka ahayn sida Gettysburg Address ee kalaas Ingiriisi ama Taariikh ah ama qoraal cilmiyeed ee kalaas Bay'oolaji ama Kimistari ah. Inta badan akhriska laga rabo kuuliyadda iyo shaqadu waa qoraal wax-sheeg oo aan khayaal ahayn, sidaa darteed isbeddelkaan wuxuu ka caawin ardaydu tallaabada xigta.
- **Shiish saarka suugaanta dhammaan waxa la dhiganayo oo dhan:** Dhammaan macalimiinta meelo cayiman ee la dhigayo, sida taariikhda ama sayniska, waxa laga filayaa inay baraan ardayda sida loogu noqdo akhriyayaal fiican maaddadooda. Kan sidoo kale waxa loo yaqaan "suugaanta anshaxeed."
- **U bandhigga ardayda qoraallo kakanaan badan:** Awoodda ardayga ee inuu akhriyo qoraalo kakan waxay go'aaminaysaa u diyaarsanaanta kuuliyad marka loo eego waxyaalaha kale oo dhan.
- **Soosaarista qoraal caddayn kusalaysan, oo qancineed:** Ardaydu waxay awood u yeelan doonaan inay wax u qoraan qaab cad, kooban oo soo jiidasho leh, si la mid ah marka ay galaan kuuliyadda iyo shaqada.

Side macalimiintu u taageeraan bartayaasha luuqadda Ingiriiska buuxinta Common Core?
OSPI waxay kala shaqaysaa degmo dugsiyeedyada si loogu tabobaro macalimiinta, loo wadaago khayraadka loona isticmaalo dabbakhaadaha ugu fiican ee taageeraya bartayaasha luuqadda Ingiriiska. Gobolka Washington wuxuu si toos ah u hirgaliyey Heerarka ku Fiicnaanshaha Luuqadda Ingiriiska si loo taageero barista luuqadda kusalaysan farshaxanada luuqadda Ingiriiska iyo xisaabta. Heerarkaan cusubi waxay ka caawin macalimiinta inay taageeraan koboca luuqadeed ee bartayaasheena luuqadda Ingiriiska.

Waa kuwaan qaabab macalimiintu u taageeri karaan bartayaasha luuqadda Ingiriiska iyaga oo ilaalinaya filashooyinka sare ee heerarka Common Core:

- Xoojinta bey'ad waxbarasho taasi ah mid arageed, toos ah oo falgal leh;
- U dabbaaldegga iyo isdhexgalka dhaqamada iyo luuqadaha bartayaasha luuqadda Ingiriiska fasalka dhexdiisa;
- U barista farshaxanada eray-bixinta luuqadda Ingiriiska iyo xisaabta si cad;
- Abuurista agab caawinaya bartayaasha luuqadda Ingiriisku inay ku isticmaalaan shaqada heerka fasalkooda noloshooda;
- Raadraaca horumarkooda iyo hagaajinta xeeladaha barista si loo buuxiyo baahiyaha ardayda;
- Haddii loo baahdo, siinta bartayaasha luuqadda Ingiriiska wakhtiga dheeraad ah si ay u dhammaystiraan imtixaanada ama shaqada kalaaska;
- Siinta bartayaasha luuqadda Ingiriiska ikhtiyaarro kala duwan si ay u muuqato fahamkooda aragtida;
- Siinta bartayaasha luuqadda Ingiriiska fursado dheeraad ah si ay ula falgalaan dadka Ingiriiska sida fiican ugu hadla;
- Ka caawinta bartayaasha luuqadda Ingiriiska inay kobciyaan fahamkooda aragtiyaha iyo isticmaalka luuqadda tacliineed iyada oo la waydiinayo inay dabbakhaan la hadalka iyo la falgalka facooda kalaaska.

Sidee macalimiinta u taageeri ardayda leh baahiyaha gaarka ah buuxinta Common Core?
OSPI waxay kaashanaysaa degmo dugsiyeedyada si ay u siiso macalimiinta macluumaad dheeraad ah, tabobarro, iyo taageero si aanu u caawin karno ardaydayada leh baahiyaha gaarka ah. Waa kuwan qaabab macalimiintu u taageeri karaan ardayda leh baahiyaha gaarka ah helista Common Core:

- Waafajinta ahdaafta Qorshaha Waxbarashada la Khaasyeelay ee ardayga Common Core sannad kasta;
- Siinta baris tayo sare, oo cilmi-baaris kusalaysan taasi oo tixgalinaysa baahiyaha ardayga;
- U soo bandhiga macluumaadka qaabab badan iyo u oggolaanshaha ardaydu inay u muujiyaan jawaabahooga qaabab kala duwan;
- Ka caawinta ardayda inay helaan oo isticmaalaan aaladaha teknoolajiyeed iyo adeegyada ka taageeraya shaqadooda manhajka waxbarasho ee guud iyo Common Core.